

Marka Ilmuhu Khatar Ugu Jiro In Looga Faa'iideysto Ka Ganacsiga Jirka ee Galmoodka (CSE)

Waa Maxay Calaamadaha Digniinta Ah Ee Lagu Ogaan Karo In Ilmaha La Khiyaamay?

- ◆ *Ka maqnaashaha dugsiga / guri ka carar / hoy la'aan (dib jimimo)*
- ◆ Lacag caddaan oo fara badan uu heysto
- ◆ Furaha qolalka hoteelada
- ◆ *Laba Telefoonada gacanta, laba barnaamij oo fariimaha qoraalka ah la isugu diro, laba magac oo kala duwan barnaamijyada baraha bulshada*
- ◆ Calaamado jirka ka muuqda (jirka la xardho, waxyaabaha la isku qurxiyo)
- ◆ *Alaabo qaali ah oo uu heysto isaga oo aan dakhli laheyn (gaar ahaan timaha, is qurxinta, telefoonada gacanta, dharka)*
- ◆ Ka been sheega da'da / heysta aqoonsi been abuur ah/macluumaad kala duwan oo laga soo sheego
- ◆ Isbedel degdeg ah oo ka yimaada shaqsiyadda; dabeecado is qarín ah marka ay la joogaan " saaxiibkooda cusub" iyaga oo sheega "in la daryeelay," gooni uga go'a dugsiga, ciyaaraha iyo bulshada
- ◆ In uusan la socon waxyaabaha ka dhacaya bushada ama aan la ogeyn halka uu joogo
- ◆ Dhar jirku ka muuqdo, alaabada galmoodka, cinjirka galmoodka, daawada galmoodka ama qalab kale oo la xiriira galmoodka.

What Are the Guiding Principles for Engaging with a Child Who May Be Exploited?

- ◆ **U muujin naxariis oo aan lagu qiimeyn dhaqankiisa mar kasta.**
- ◆ Ku adkeyso; la soco talaabo kasta oo uu qaado hana sameyn balanqaad aadan fulin karin.
- ◆ Kalsooni iyo dhisitaanka xiriirka: tani waa mid si tartiib tartiib ah u socota waxaana ka hor yimaada dhibaatooyin.
- ◆ La Socoshada Dhaqanka: tixgeli waxyaabaha la xiriira dhaqanka ee xasaasiga ah iyo waayo aragnimada u gaarka ah qof kasta. La soco waxyaabaha aad shaqsi ahaan aaminsan tahay, iilashada iyo guud ahaan dhaqanka.
- ◆ Badbaadada: xoogga saar amaanka guriga, yareynta khatarta iyo dajinta istaraatiijiyad lagu badbaadinayo dhalinta,
- ◆ Dhiirgelinta iyo xoojinta shaqsiyadda: waa in uu heystaa macluumaad la xiriira xaaladda oo lagu dhiiri geliyaa inuu go'aaro go'aanka ku haboon marka kasta oo ay suurogal tahay.

Waa Maxay Su'Aalaha Aan Weydiin Karo?

- ◆ Waa maxay caawinaadda aad dooneyso?
- ◆ Dadka qaar ayaa galmoodka lacag ku hela ama si ay u noolaadaan, taasi miyey kugu dhacday hadda ka hor?
- ◆ Waxa aan dareen ka qabaa nabadgelyadaada ama si aad ku badbaadeyso, taasi miyey kugu dhacday hadda ka hor?
- ◆ Waxa aan daneynaa sida aad ku badbaadeyso, ma jiraan meelo aad is leedahay khatar ayaa kuugu jirta haddii aad tagto. Ma jiraan dad aad is leedahay khatar ayey ku yihiin naftaada xilligan la joogo?
- ◆ Waxa aan daneynayaa noloshada. Kuguma qiimeynayo waxyaabaha aad naftaada iiga sheegto ama aad dooneyso in aan kaa caawiyo. Waxa aan halkan u joogaa in aan ku dhageysto haddii aad dooneyso in aad hadasho ama aad dooneyso in aan ku caawiyo.

How Do I Identify At-Risk Youth?

- ◆ Weydii su'aalo gaar ah oo aad ku ogaaneyso qodobada khatarta ah ama ka qeyb galka ee CSE
- ◆ Kordhi dadaalka aad dooneyso in aad ku ogaato ilmaha ka carara guriga ama ka maqan waxbarashada
- ◆ Wax ka ogoow ciidamada nabadgelyada dhaqdhaqaaqa kooxaha rabshada geysta ee gaarka ah (amadhalinyarada **haddii** ay ahaan tahay in aad ka hadashaan)
- ◆ Kala hadal STI/STD, uurka, iyo dhaawac aan la garaneyn sida uu ku gaaray
- ◆ U kuurgal xiriirka dadka ee soo noqnoqda; yaa isla xiriira, yaan wada xiriirin, yaa maamulaya

Sidee ayaan ku caawin karaa

La soo xiriir khadka Bridge Collaborative: 1.855.400. CSEC ama imeyl CommunityAdvocate@YouthCare.org